



Xogururinta sanadlaha ah ee ardayda, qoysaska iyo shaqaaluhu way bilaabmayaan

Toddobaadka soo socda Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay bilaabi doonaan xogururinta sanadlaha ah kaasi oo noo oggolaanaya inaan ururino xogta si aanu u qaadanno go'aamo xogogaal ah ku saabsan cimilada iyo dhaqanka dugsiya. Xogururinta Dugsiyada Guulaystay waxa uu bilaabmayaa Isniinta, Jan. 27.

Saddex qaybood oo ah bulshada PPS ayaa ka qaybqaadan doona xogururinahan kala duwan: ardayda, kuwaasi oo la waydiin doono inay la wadaagaan khibradooda fasaladooda iyo dugsiya; qoysaska, kuwaasi oo la waydiin doono filashadooda dugsiya ay ardaydoodu dhigtaan; iyo shaqaalaha dugsiya oo dhan. Muddada xogururinta ardaydu waxa uu soconayaa ilaa Feb. 14, xogururinta qoyskuna waxa uu furmi doonaa ilaa Feb. 28.

Degmadu waxa ay marlabaad la shaqayn doontaa Panorama Education. Sanadkii hore waxa aannu wada shaqayn la bilawnay Panorama markii ugu horrasay, [natiijooyinka 2019](#) iyagu waxa ay noo noqonayaan meel taasi oo noo oggolaanaysa inaan ku cabirno horumarinta sanadada soo socda. Xogururintu waxa ay dabooli doontaa mawduucyada sida dareenka lahaanshiyaha, badbaadada dugsiya, cimilada dugsiya, caqabadaha kaqaybgalka qoyska, iyo sidoo kale aragtiyaha iyo dareenada ardayda ee kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo u dhannaanshaha dugsiya.

Saddex kooxood oo arday ah ayaa ka qaybqaadan doona: fasalada afraad iyo shanaad ee heerka dugsiya hoose; fasalada lixaad iyo toddobaad ee heerka dugsiya dhexe; iyo ardayda bilawga iyo labaad ee dugsiya sare.

Waalid kasta iyo wakiil kasta oo ah degmada waxa lagu casuumi doonaa inuu ka qaybqaato xogururinta, kaasi oo qoysasku ku heli karaan Ingiriisi, Isbaanish, Fiitnaamiis, Jayniis, Ruush, iyo Soomaali. Xogururinta qoysku waxa uu si toos ah uga bilaabmi doonaa Jan. 27 halkan www.pps.net/sss2020.